NORTH DAKOTA
DEPARTMENT *of* HEALTH

WASAARADDA CAAFIMAADKA
EE NORTH DAKOTA

VX

SU'AALAHA INTA BADAN LA ISWEYDIIYO

VX waa kiimiko bini'aadanku sameeyay oo loo adeegsado dagaalka laguna tilmaamay waxyeelle xidid. Waxyeelleyaasha xididku waa kuwa ugu sun badan sida ugu dhakhsaha badan na u hawla marka la eego waxyeelleyaasha loo adeegsado dagaal kiimiko. Waxay u eeg yihiin noocyada sunta cayayaanka qaarkood (dilaaga cayayaanka) la yidhaahdo 'organophosphates' marka la eego sida ay u shaqeeyaan dhibaatada waxyeellada leh ee ay keenaan. Hase yeeshe, waxyeelleyaasha xididku way ka xoog weyn yihiin sunta cayayaanka ee ah 'organophosphate.'

VX waa hoore saliid aad moodid, ur lahayn, dhadhan lahayn oo midkeeduna yahay hurdi ama jaale oo si gaabinaysa neef u noqota ama u uumi baxda. Waxa uumi-baxeedu u gaabiya sida uumi-baxa saliidda motoorka. VX lagama helo degaanka iyadoo dabiici ah.

Miyaa VX loo isticmaalay hub ahaan wakhtiyadii hore?
VX iyo waxyeelleyaasha xididka ee kale waxa dhici karta in loo isticmaalay dagaal kiimiko mudadii dagaalku ka dhexeeyay Iiraan iyo Ciraaq sannadihii 1980-tanadii.

Sidee bay VX dadka u soo gaadhi kartaa?
VX waxay dadka u soo gaadhi kartaa dhawr siyaabood:

- Ka dib marka VX lagu sii daayo hawada, waxay dadka ku soo gaadhi kartaa taabasho maqaarka ama indhaha ah ama neefsasho (uumiga VX oo ay neefsadaan).
- Inkastoo VX aanay si fudud biyaha ugu qasmin sida waxyeelleyaasha xidid ee kale, waxa loo isticmaali karaa in biyaha lagu sumeeyo. Ka dib marka VX lagu shubo biyaha, waxay dadka soo gaadhi kartaa marka ay taabtaan ama ay cabbaan biyaha ay ku jirto.
- Ka dib marka cunto lagu sumeeyo VX, waxay dadka soo gaadhi kartaa marka ay cunaan cuntada sumeysan.
- VX halistoodu waxay inta badan mid ka imanaysa qaabkeeda hooreha ah, laakiin haddii la kuleyliyo oo la gaadhsiiyo heerkul aad u sareeya, waxay isu beddeli kartaa qadaro yaryar oo ah uumi (neef).
- Qofka dharkiisu waxa uu sii wadi karaa sii deynta VX mudo ah 30 daqiiqadood ka dib marka u soo gaadho VX oo ah uumi, taasoo keeni karta in suntu gaadho dadka kale.
- Sababtoo ah VX si gaabis ah ayay u baaba'daa, dadka si is-daba joog ah ay VX iyo/ama waxyeelleyaasha xidid ee kale u soo gaadhaan waxa iman doonta inay isugu tagaan jidhka oo bataan.
- Sababtoo ah uumiga VX waxa uu ka culus yahay hawada, waxay ku jiifsan doontaa aaggaga joogoodu hooseeyo, waxana ay halkaa ka abuurtaa halis soo-gaadhis oo sii weyn.

Sidee bay VX u shaqeysaa?
Baaxadda ay leedahay sumeynta ay keento VX waxay ku xidhan tahay tirada VX ee qofka soo gaadhay, sida ay qofka ugu soo baahday ama u soo gaadhay iyo mudada ay qofka ku baahaysay.

Calaamadaheeda waxa la arkaa gudaha dhawr sekan ka dib marka ay qofka soo gaadho VX oo ah qaab uumi ah isla markaana waxa calaamadaheeda la arkaa gudaha dhawr daqiiqadood ilaa 18 saacadood ka dib soo-gaadhisteeda marka ay tahay qaab hoore ah.

VX waa ta ugu awoodda weyn dhamaan waxyeelleyaasha xididka. Marka la barbar dhigo waxyeellaha xidid ee sarin (oo magaceeda kale yahay GB), VX waxa la og yahay inay ka sii sun badan tahay marka ay maqaarka meel ka soo gasho iyo inay xoogaa ka sii sun badan tahay marka la neefsado. Waxa suuragal ah in wixii ah taabasho hoore VX, haddii aan isla markiiba maqaarka laga maydhin, ay geeri keeni doonto.

Dhamaan waxyeelleyaasha xididku waxay waxyeello sun ah keenaan marka ay shaqada ka horjoogsadaan kiimikada jidhka u ah "fureyaal damin" kuwaasoo ay ku shaqeeyaan qanjidhada iyo muruqyadu. Marka aanay jirin "fure damin," waxa dhacaysa in qanjidhada iyo muruqyadu ay si joogto u shidan yihiin. Waxa dhici karta inay daalaan ka dibna aanay awoodi karin inay sii wadaan shaqada neefsashada.

VX waa ta ugu uumi-bax yar waxyeelleyaasha xididka, taasoo macnaheedu yahay inay tahay ta ugu gaabisa waxyeelleyaasha xidid xagga ka-tagista hoore iyo isu-beddelka uumi. Sidaa daraadeed, VX mudo aad bay degaanka ugu raagtaa. Marka ay jiraan xaalado cimilo oo caadi ahi, VX waxay alaabta ay taabatay ku ooli kartaa maalmo. Marka qabow darani jiro, VX waxay sii joogi kartaa dhawr bilood.

Sababtoo ah si gaabis ah bay neef isugu beddeshaa, VX waxay noqon kartaa mid leh halis mudo dheer jirta iyo waliba halis jirta mudo gaaban. Sidaa daraadeed meelaha ay VX sumeysay waa in laga soo qaadaa inay leeyihiin halis mudo dheer.

Waa maxay calaamadaha iyo tilaamaha isla markiiba laga arko soo-gaadhista VX?
Sababtoo ah VX ma laha ur, waxa dhici karta in dadku aanay ogaan inay soo gaadhay.

Dadka ay soo gaadhay qadar yar ama dhexdhexaad ah oo ah VX ka dib neefsasho, cunid (liqid), ama taabasho maqaar waxa dhici karta inay isku arkaan qaar ka mid ah ama dhamaan calaamadaha soo socda gudaha dhawr sekan ilaa dhawr saacadood ka dib soo-gaadhista:

- Sun goraraya
- Indho biyo leh
- Wiil indho oo yaryar oo dhibic yar noqda
- Indho xanuun
- Aragga oo isku darsama
- Dhareer iyo dhidib siyaado ah
- Qufac
- Cadaadis laabta ah
- Neefsasho degdeg ah
- Shuban
- Kaadida oo soo korodha
- Wareer
- Lullo
- Tamar-dari
- Madax-xanuun
- Lallabo, matag, iyo/ama xanuun caloosha ah
- Garaac wadne oo gaabis ah ama dheeraynaya
- Cadaadis dhiig oo si aan caadi ahayn u hooseeya ama u sareeya

Xiitaa dhibic yar oo ah VX oo soo gaadhay maqaarka waxay keeni kartaa dhidid iyo muruq dubaaxis ka dhaca meesha ay ka taabatay maqaarka. Marka ay qadar weyn oo ah VX ay qofka soo gaadho si kastaba ha ku soo gaadhee waxa iman kara dhibaatooyinkan caafimaadka waxyeellada u leh ee soo socda:

- Miyirka oo taga
- Gariir
- Qalayl
- Neesashada oo joogsata, taasoo suurogal ahaan keeni karta geeri

Isku-aragga calaamadahaa iyo tilmaamahaa qasab ma ah in macnahoodu yahay in qofka ay soo gaadhay VX.

Waa maxay waxyeellada caafimaad ee mudada dheer?
Dadka suntu si khafiif ama dhexdhexaad ah u soo gaadho caadi ahaan si buuxda ayay uga bogsadaan. Dadka ay aad u soo gaadho lagama yaabo inay ka badbaadaan. Iyagoo taa kaga duwan sunta cayayaanka ee ah 'organophosphate', waxyeelleyaasha xididka laguma arag dhibaatooyin maskaxda ah oo ay keenaan oo sii jira mudo ka badan hal ilaa laba todobaad ka dib soo-gaadhista.

Sidee bay dadku isku badbaadin karaan, maxaase la rabaa inay sameeyaan haddii ay soo gaadho VX?

Ka-bogsashada soo-gaadhista VX waxay suuragal tahay marka la daweeyo, laakiin waa in lidka-sunta ee loo hayo si dhakhso ah loo isticmaalaa si uu waxtar u yeesho. Sidaa daraadeed, waxa ugu fiican ee la sameyn karo waa iyadoo la iska ilaaliyo soo-gaadhista:

- Ka tag aagga VX lagu sii daayay oo tag meel hawo nadiif leh. Meel hawo nadiif leh oo dhaksho loo tago waxay si weyn waxtar uga leedahay yareynta suuragalka geeri ka timaada soo-gaadhista uumiga VX.
  - Haddii VX lagu sii daayay dibadda, ka tag aagga lagu siiyay VX. Tag dhulka ugu sareeya sababtoo ah VX waxay ka culus tahay hawada waxana ay ku jiifsataa dhulka hooseeya.
  - Haddii VX lagu sii daayay gudaha, dibadda uga bax dhismaha.
- Haddii dadku u maleynayaan inay suntu soo gaadhay, waa inay iska saaraan dharkooda, si dhakhso ah u meydhaan jidhkooda oo dhan iyagoo isticmaalaya saabuun iyo biyo, isla markaana sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah u doontaan daryeel caafimaad.
  - *Iska-saarista iyo fogeynta dharka:*
    - Si dhakhso ah iskaga saar dharka ay ku jirto VX hoore ah. Dharka wixii u baahan in madaxa laga saaro waa in la jaro halka madaxa dushiisa la sii marin lahaa. Haddii ay suuragal tahay, ku xidh dharka boorso balaastig ah ama bac. Ka dibna ku xidh boorsadii hore boorso labaad oo balaastig ah. Dharka oo sidaa la iskaga saaro loona xidho waxay dadka ka badbaadin doontaa wixii ah kiimiko ee ku jira dharkooda.
    - Haddii dharka lagu riday boorsooyin balaastig ah, wargali waaxda caafimaadka ee degmada iyo gobolka ama shaqaalaha gurmadka marka ay yimaadaan. Gacanta ha la galin ama ha qaadqaadin boorsooyinka balaastigga ah.
    - Haddii aad dad kale ka caawinaysid inay dharka iska bixiyaan, isku day inaanad taaban meelaha sumeysan, isla markaana sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka u saar dharka.
  - *Maydhista Jidhka:*
    - Sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah, wixii ah VX hoore ah ka dhaq ama ka maydh maqaarka iyadoo la isticmaalaya tiro badan oo ah saabuun iyo biyo. Ku-maydhista saabuun iyo biyo waxay dadka ka badbaadin doontaa wixii ah kiimiko saaran jidhkooda.
    - Indhaha ku maydh biyo saafi ah 10 ilaa 15 daqiiqadood haddii ay gubanayaan ama haddii araggu isku darsamay.
- Haddii VX la liqay, ha ka keenin qofka matag ama ha siinin cabbitaano u cabbo.
- Isla markiiba raadso daryeel caafimaad. Garaac 911 ka dibna sharax wixii dhacay.

Sidee baa soo-gaadhista VX loo daweeyaa?
Daweyntu waxay ka kooban tahay sida ugu dhakhsaha badan oo VX jidhka looga qaado iyo daryeel caafimaad oo taageero ah oo lagu bixiyo goob cisbitaal ah. Lidka-sunta ayaa loo hayaa VX. Waxay ugu waxtar badan yihiin haddii qofka loo siiyo sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah ka dib soo-gaashista sunta.

Wixii ah war dheeraad ah, wac North Dakota Department of Health (Waasaaradda Caafimaada ee Waqooyiga Dakota) oo leh lambarka 701.328.2378.